



City of Seattle

ORCA OPPORTUNITY PROGRAM



Ma doonaysaa kaarka ORCA?

Haddii aadan u qalmin kaarka ORCA ee Seattle Public Schools, waxaad u qalmi kartaa barnaamijka City of Seattle ORCA Opportunity. Kaararkan ORCA waxay sahlayaa oo hormarinayaa in ay u saamaxdo ardayda dugsiga u lugeya ama lacag ku raaca gaadiidka.

Kaararka ORCA ee laga bixiyo barnaamijkan waxuu shaqaynayaan laga bilaabo Sabtembar 2020 illaa Agoosto 2021. U qalmitaanka dakhliga loogu talagalay barnaamijkan waxuuy waafaqsan yahay barnaamijyo kale oo baddan oo ay kamid yihiin: SNAP, Qado Lacag la dhimo ama bilaash ah, iyo ORCA LIFT. Kaararka ORCA waxaa lagu raaci karaa King County Metro, King County Water Taxi, Seattle Streetcar, Sound Transit, Community Transit, Pierce Transit, Kitsap Transit, iyo Everett Transit.

WAXYAABAHA KA REEBAYA U QALMIDA

Ardayda raacda gaadiid khaaska ah waxay u qalmaan kaarka ORCA, lyada oo loo marayo barnaamijka ORCA ee Dhallinyarada.

Waxyaabaha Kale ee u qalmida kaa reebaya waxaa lagu qiimeyn doonaa marka la codsado. Su'aalaha waa in lagu soo diraa Email kan ORCAOpportunity@seattle.gov.

SIDEE LA ISU QORAA

Ardayda lagu qoray barnaamijka sannadkii la soo dhaafay uma baahna in ay buuxiyaan foom codsi cusub. Ardayda waxey si toos ah ugu qornaanayaana barnaamijka.

Codsadayaasha cusub waxay u baahanyihiin in ay buuxiyaan foomka codsiga oo ay ka soo saxiixaan waalidkooda ama qofka ayaga masuulka ka ah. Ardayda da'doodu tahay 18 sanno ama ka weyn uma baahna in uu u saxiixo waalidkooda ama qofka ayaga masuulka ka ah.

HALKEE LA ISKA QORI KARAA

Sidoo kale ardaydu waxay keeni karaan foomka codsiga oo buuxa xafiiska iskuulkooda. Ardaydu sidoo kale waxay qaadan karaan sawirka arjiga dhammeystiran waxayna u diri karaan (206) 256-6722.

Wixii macluumaad dheeraad ah eek u saabsan, fadlan fariin ku dir email ka ORCAOpportunity@seattle.gov ama wac lambarkan (206) 256-ORCA (6722) ama booqo boggaan internet ka www.seattle.gov/ORCA-Youth

Si aad ugu qalantid barnaamijka waxaad u baahantahay in aad:

- Tahay arday dhigta Seattle Public Schools (Fasalka 6 – 8);
- Aadan hadda heysan kaarka ORCA ama adeega baska jaalaha ah ee Seattle Public Schools; iyo
- In aad Ku nooshahay guri dakhliga soo gala uu ka hooseeya qadarka lacagta lagu qoray jadwalka hoose.

U QALMITAANKA DAKHLIGA

Xajmiga Qoyska	Dakhliga Ugu baddan ee Qoyska
2	\$34,480
3	\$43,440
4	\$52,400
5	\$61,360
6	\$70,320
7	\$79,280
8	\$88,240

Haddii uu ardaygaagu u qalmo ORCA Opportunity Program, waxaad u qalmi kartaa in lagaa dhimo lacagta ujrada gaadiidka ee ORCA LIFT. Wixii macluumaad dheeraad ah ku saabsan, booqo boggaan internetka ah www.orcalift.com ama wac (206) 553-3000.



Haddii aadan u qalmin Magaalada Seattle ORCA Opportunity Program ama Seattle Public Schools-bixiya kaararka ORCA, waxaad u qalmi kartaa in aad soo iibsatiid kaarka dhallinyarada ORCA ee ka ahaada King County Metro. Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah ee khuseeya helida kaarkaaga dhallinyarada ORCA ee ka ahaada King County Metro, booqo boggaan internetka ah <http://bit.ly/MetroORCAYouth>



City of Seattle

ORCA OPPORTUNITY PROGRAM

Codsiga

2020-2021

Magaalada Seattle waxay aruurinaysaa macluumaadkaan si ay umaarayso barnaamijka si iskeed ahna ulama wadaagayso macluumaadkaan shirkado ama barnaamijyo kale. Haddii Magaalada Seattle ay hesho codsiga faafinta bulshada ee macluumaadkaan, waxay samayn doontaa dadaal kasta si ay u ilaaliso sirnimada macluumaadka ardayga si waafaqsan ogolaanshaha sharciga.

Magaca Danbe	Magaca Koobaad	
ID ga Ardayga	Dugsiga	Fasalka
Cinwaanka Boosta (Magaalada, Gobolka, Nambar nambar)		

Si aad ugu qalanto barnaamijkaan, dakhliga gurigu waa inuu noqdaa mid kayar dakhliga ugu yar ee qoysku heli karo sida kucad shaxda. Fadlan tigsaar bokiska hoose hadii dakhliga gurigaagu uu kujiro xadidka dadka uqalma.

Sanduuqa waa in la xushaa si dalabkaaga loo aqbalo.

Tigsaar haddii aad dakhli ahaan uqalanto ☐

(Fadlan isticmaal shaxanka hoose si aad u tixraacdo si aad u go'aamiso u-qalmitaankaaga.)

Turada Dadka qoyska	2	3	4	5	6	7	8
Dakhliga Ugu Badan ee Qoyska	\$34,480	\$43,440	\$52,400	\$61,360	\$70,320	\$79,280	\$88,240

Adoo saxiixaaya hoos, waxaad xaqiijinaysaa macluumaadka kore uu yahay mid sax ah aadna ogolaanayso Xeerarka ORCA Opportunity Program (Barnaamijka Fursadaha ee ORCA) ee Magaalada Seattle.

Saxiixa Ardayga	Taariikhda
Saxiixa Waalidka ama Masuulka	Taariikhda

Xeerarka Barnaamijka Fursadaha ORCA ee Magaalada Seattle